Maxay ka yiraahdeen odayaasha dhaqanka beesha Shangamaas anadkii 2007 sheegashada uu Faqi sheegtay suldaanimada beesha waa kuma SULDAAN XEYDAR SUUFI MUNYE .

Sida aynu ka warqabno, waajibaadka ugu waaweyn ee Ilaahay (SW.) faray Ummadda waxaa ka mid ah in ay ku kulmaan dhabbaha Ilaahay oo aysan ku kala tegin oo ayna isku qab-qabsanin, waxaana suurta gal ahayn in Ummad waliba ay ka badbaado musiibo kala dhalato is qab-qabsiga, isnecayb iyo kala tag sii kala fogeeya midnimada, iskaashiga iyo walaaltinimadaba, waxaase ka bad-baadin kara markii ay ku ergadaan taladooda & amuurahoodaba Hoggaamiye ay doortee, ayagoo hab raac ka dhigaaya Qawaaniinta iyo heerar dhaqameedyada Bulshada Soomaaliyeed.

Sannadkii 2007 ayaa si aan xishood lahayn ninka la yiraahdo Faqi Sayid Faqi oo isaga iyo dhowr shaqsiyaad oo dabada ka riixaya kuwaasoo uu ugu horeeyo walaalkiis Ali Said ay ugu caleemo saareen inuu yahay Suldaanka Beesha Tunni, si uu u buuxiyo mansabkii uu baneeyay adeerkiisa Cumar Faqi.

Magacaabistaas iyo caleema saarka beenta ah ee riya maalmeedka ah ujeeddada ka dambaysa waxay tahay dano gaar ah oo ay wataan shaqsiyaadka dabada ka riixaya ninkan , taasoo ah in mustqabalka ay ku gaaraan mansab siyaasadeed oo ay iyagu noqdaan dadka marka magacaabid loo baahdo isa soo magacaaba .

Waxaa beryahan kooxahaas danaha gaarka ah wata oo qiiq isku qariska ah ay ***Websiteyada*** qaarkood ku daabaceen warar ah in Suldaanka ay iyagu magacowdeen si xooga ah looga soo saaray goobtii uu ka socday shirka oday dhaqameedyada soomaaliyeed iyagoo weliba ku aflagaadeynaya kuna sheegaya in ka saariddaas uu ka dambeeyay taliyaha ciidanka Booliska Soomaaliyeed S/Gaas Dr Shariif Sheekhuna Maye iyagoo weliba websiteka Amin Amir leeyahay loogu daabacay kartoon aflagaaddo ah oo ay ku sheegayaan in wiilkaas yar ee maiskiinka ah uu taliyuhu bastoolad kaga soo saaray shirka.

Wiilkan maskiinka ah ee la soo lug gooyay ayaa isagu si suuq madow ah ku tagay madashii uu shirka ku socday isagoo ku daba gabanaya mid ka mid ah salaadiinta beelagha D/m sidaasna ay ugu suuragashay inuu hal habeen dhex

seexdo qolkii suldaankaas, hase yeeshee subixii xigay markii quraacda la aaday ee shaqaalihii goobta joogay ay arkeen ninkan quraacda u dhuumanaya ayaa waxay taas ku qargeliyeen ciidamada amniga ee goobtaas joogay kuwaasoo markii ay suaalo weyfiiyeen suldaan beenaadka isla markaana ay ka waayeen wax dokumenti ah oo muujinaya inuu ka mid yahay marti sharafta halkaas dibadda uga soo saaray.

Siyaasiinta, waxgaradka, odeyaasha iyo aqoonyahaanada ka soo jeeda Degmada Baraawe ee Qurbaha ku nool, iyo weliba odayaasha dhaqanka ee dalka ku sugan ayaa sannadii 2007 waxay soo saareen ”***Bayaano*** ” ay ku beeninayaan falkaas gurracan ee caleemo saarka beenta ah ee ay ku kaceen Faqi iyo walaalkiis waxayna si buuxda bayaanadaas ugu caddeeyeen in Suldan Xeydar Suufi Munye uu yahay suldaanka beesha kaasoo doorashadiisa iyo caleemo saarkiisaba ay ku dhacday si sharciga waafaqsan sannadkii 1985.

Halkan riix si aad u dhagaysatid bayaanka odayaasha oo laga sii daayay idaacadda HornAfrik sannadkii 2007 (Dhagayso)

Suldaan Xaydar Suldaan waa labadan nin ee ma xishoodeyaalka ah seeddigood oo wuxuu qabaa walaashood caruurta uu Suldaan Xaydar dhalayna ma xishoodeyaalkan abtiyaal bey u yihiin.

Waxaa ***Websidyada*** qaarkood lagu daabacay in Faqi Sayid Faqi oo loo caleemo saaray Suldaanka Beesha Tunni, si uu u buuxiyo mansabkii uu baneeyay adeerkiisa Cumar Faqi oo dhowaan geeriyooday. Qaar kale lagu cambaareeyey laguna diidan yahay ”***Caleemo saarkaas***”, ayagoo sabab uga dhigaayaan in been abuur iyo musabidba lagu sameeyay Bulshada ka tirsan Beesha Tunni, maadaama aysan jirin cid lagala tashadey amaba oggolaaday iyo iyadoo Odeyaasha Dhaqanka ee Beesha Tunni aysan ka warqabin, oggolaashona laga helin.

Sida la wada ogsoon yahay, taariikhdu dadku way ka faa’ideystaan haddii taariikhdaasi tahay mid habboon, waxayna ka qaataan duruus ay ku waano yeeshaan, isla markaana raad-raac ka dhigtaan, Culumaduna waxay na bareen in taariikhdu tahay mid aan duqoobin oo aan baabi’in, sheegtana kii ”***gef galay, kii gallad galay, kii sabray iyo kii sadbursaday***”.

Sidaas darteed, waxaanu door bidnay in aan diyaarino ”**Qoraal**” oo xambaarsan warar xog-ogaal ah, dhacdooyin iyo macluumadba, kuwaas oo aan u aragnay in ay ku habboon yihiin in loo iftiimiyo dadka qaarkii, gaar ahaan dhallinyaradeena iyo jiilka ka dambeeya oo u baahan in looga tago wax taariikh ah oo noloshooda wax ka beddela.

Waxaa mahad iska leh Allihii weynaa ee nimcooyinka fara badan ee uu na siiyay ay ka mid yihiin in uu nagu ilhaamiyay noona fududeeyay in aanu soo uruurino warar ka banaan kana barax tiran beenta iwm., qoraalna ka sameeno. Nuxurka uu xambaarsan yahay qoraalka, cidna loolama jeedo amaba loogu daneeyo, hase yeeshee, bacdamaa dhacdooyin badan aan xog ogaal iyo markhaatiba ka nahay, waa in aanu runta ka sheegno, si ay kaalmo iyo xog-ogaalnimada u noqdo Odeyaasha xal u helida iyo go’aan ka gaarida khilaafka ka aloosan qaar ka mid Mujtamaceena dhexdooda.

Soomaalida waxay ku maah-maahdaa ”***run sheeg wax ku markhaati fura ma weyneysid***”, sidaas awgeed,shaki kama qabno in dad badan oo ku abtirsada Mujtamaca Reer Baraawe ay ka marag kici doonaan maclumaadka ku xusan qoraalka, marka laga reebo kuwa ay ku jirto caadifad qabiileed, qaraabo-kiil, eex, qof nacayb iyo kuwo aan Alla ka baqayn oo iska indha tiraya awaamiirta Alle, waxaana kuwaas xusuusinaynaa in Eebbe Qur’aankiisa ku yiri:

”***Kuwa xaqa rumeeyayow***, noqda kuwa u istaaga caddaalad oo ah marag Eebbe, ha ahaato naftiina ama waalidkiisa ama qaraabadiinba, haddii ay yihiin hodon ama fuqraa. Eebbaa u muqnaasho badan ee ha ka raacina hawada inaad caddaalo fashaan, haddaadse iilataan ama jeesataan Eebbe waxaad camal faleysaan waa og yahay (***Suurat Al Nisaa, ayyad 135-aad***).

Shahaadadu waxay leedahay anshax xambaarasho iyo mid gudasho (aadaaba taxamul wal adaa’), sidaas darteed, qof kasta uu waajib ku ah gudashadeeda, haddii uu ka aamuso ama uu diido in uu marag ka furo arrin uu asagu xog-ogaal u yahay, wuxuu noqonaaya dambiile, Eebbena wuxuu yiri: ”yaa ka dulmi badan ruux qariya marag agtiisa Eebbe ku yeeshay, Eebana ma halmaamo waxaad falaysaan (Suurat Al Baqra, aayadda 140-aad). Waxaa kale oo Eebbe yiri: ”Hana qarinina maragga, ruuxii qariyana wuu dambaabi qalbigiisu, Eebena waxaad camal fashaan waa ogyahay (Suura Al Baqra, Aayad 283-aad).

Haddaba, annagoo dhowrayno awaamiirta Eebbe ee kor ku xusan, waxaanu qori doona haddii uu Eebbe raalli ka noqdo dhowr arrimood oo muhiim ah, Tusaale ahaan:

1. Maxaa loo diiday Suufi Munye in uu dhaxlo amaba uu buuxiyo mansabkii ee uu aabihiisu Aw Munye Xaaji Cabdulqaadir uu uga dhintay?

2. Maxaa loo cuskaday in Xaaji Cumar Sheegow laga dhigo Nabadoon Dacfaraad, markii uu geeriyooday Aw Munye, isagoo dhaxtooyadiisu (Suufi Munye) joogay, qaan gaarna ahaa?

3. Xilligii, goobtii iyo dadkii doortay Suldaan Xaydar? Sababtii uu ku mutaystay in uu hanto martabada Suldaanka Tunni? Maxay ka dhexeen arrintaas Reer Aw Faqi, mise way ayideen caleemo saarka Xeydar?

4. Hawl-qabadka Suldaan Xeydar xilligii Waddanka Dowlad ka jirtay iyo Xilligii dagaalka sokeeyey ka dhacay Soomaaliya? Kaalintii uu ka qaatay Nabadgelyada Degmada Baraawe & badbaadada shacbiga intii dalaalada socday, iyadoo la ogsoon yahay in Baraawe iyo Tuulooyinkeeda ay noqdeen gobo dagaal?

7. Hoggaamiyeyaashii Dagaalka, ciddii ay la xiriiri jireen markii ay soo gali jireen Baraawe, yuu ahaa oo Suldaannimo ay ugu aqoonsanaayeen?

8. Goorma Cumar Faqi loo doortay Suldaan Beesha Tunni, Goobteese lagu doortay iyo xilligee loo doortay ama la caleemo saaray?

   Yaa ka dambeeyay in Beesha Tunni la garab mariyo xubnihii Golaha Shacbiga Soomaaliyeed KMG ee lagu dhisay Jabuuti?

La waayi mayo dad dhacdooyinka, sheekada iyo taariikhda qoraalka lagu xusi doona si kale u dhadhansada amaba u fasirta. Waxaanse lab furan ku soo dhoweynaynaa dhaliil kasta oo looga jeedo sixid iyo wax wanaajin, maxaa yeelay ma jirto hawl bani'aadam qabtay oo aan kala dhinayn.

Annagoo la kaashanayno Kitaabka la yiraahdo "***AL FIQHI AL MANHAJI CALAA MAD'HABI IMAAM AL SHAAFICI***", waxaan isla eegi doona "***Baabka Mansabka Hoggaamineed***" arrimaha soo socda:

B. Haddii Mansabka hoggamineed uu ka mid yahay waxa la kala dhaxlo iyo in kale;
C. Sifooyinka ay ku imaan karta Hoggaanka iyo Shuruudaha laga doonaayo qofka laga dhigaayo Hoggaamiye (Suldaan).

Halkan ka aqriso taariikhda iyo maraaxilka ay soo martay saladanada beesha Tunni Shangamaas

Qaybta 1AAD 2AAD 3AAD 4AAD 5aad 6aad 7aad 8aad 9aad 10aad 11aad

12aad 13aad 14aad 15aad 16aad 17aad18aad19aad 20aad